# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-648/042021** **Taar: 12/04/2021**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Diiwaan-gelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aaga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr. 96/2021**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 11aad, 75aad, 76aad iyo 77aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-45/884/2021, ee ku taariikheysan 03/04/2021, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Diiwaan-gelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aaga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr. 96/2021;

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Diiwaan-gelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aaga Cashuuraha Ka-caagan, Xeer Lr. 96/2021.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

RL: 276
RECEIVED
25/04/2021

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Diwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga Cashuuraha ka-caagan XEER LR: 96/2021**

GOLAHA WAKIILADU

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay**: | **Qodobka 11aad, 75aad, 76aad iyo 77aad** ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| **Markuu Arkay**: | Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan oo laga dhiso ama laga hirgalayo dalka Jamhuuriyadda Somaliland uu muhiim u yahay kor u qaadida dhaqaalaha, shaqo abuurka iyo maalgashiga wax-soosaarka dalka |
| **Markuu Arkay**:- | Muhiimada ay leedahay dhiirigelinta iyo soo jiidashada maalgashiga gudaha iyo kan shisheeye si ay uga dhisaan warshado waxsoosaar, isla markaana ka hirgeliyaan ganacsigooda Aagga cashuuraha Ka-caagan |
| **Markay Arkay** | Baahida loo qabo in la dejiyo xeer u gaar ah oo lagu dhaqo diiwaangelinta shirkadaha maalgelinaya dhismaha iyo ganacsiga aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan, si loo dhiirigeliyo isla markaana loo soo jiito maalgashiga loona fududeeyo adeegyada ay u baahan yihiin shirkadaha maalgalinaya aagaasi.. |
| **Markuu u Codeeyay**: | Ansixinta Xeerka Diwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan Xeer LR.96/2021 **Kal-fadhiga 45aad ee Fadhigiisi 11ad** taariikhduna ahayd **20/03/2021** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida mudanayaasha Golaha Wakiilada . |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **37 cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Diwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan **( Xeer LR.96/2021).**

## ALLAA MAHAD LEH

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Guddoomiyaha GolahaWakiilada**

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA
ARKIFIYADA
J. SOMALILAND

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADA

## Xeerka Diiwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga Cashuurta Ka-caagan
## Xeer Lr: 96/2021

**The Law for Registration of Commercial Companies in Special Economic Zones in the Republic of Somaliland, Law No: 96/2021**

## Golaha Wakiilada

**Markuu Arkay:-** Qodobka 11aad, 75aad, 76aad iyo 77aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay:-** Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan oo laga dhiso ama laga hirgalayo dalka Jamhuuriyadda Somaliland uu muhiim u yahay kor u qaadida dhaqaalaha, shaqo abuurka iyo maalgashiga wax-soosaarka dalka.

**Markuu Arkay:-** Muhiimada ay leedahay dhiirigelinta iyo soo jiidashada maalgashiga gudaha iyo kan shisheeye si ay uga dhisaan warshado waxsoosaar, isla markaana ka hirgeliyaan ganacsigooda Aaggacashuuraha Ka-caagan.

**Markuu Arkay:-** Baahida loo qabo in la dejiyo xeer u gaar ah oo lagu dhaqo diiwaangelinta shirkadaha maalgelinaya dhismaha iyo ganacsiga aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan, si loo dhiirigeliyo isla markaana loo soo jiito maalgashiga loona fududeeyo adeegyada ay u baahan yihiin shirkadaha maalgalinaya aagaasi.

# Waxaa uu ansixiyay

### Xeerka Diiwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga Cashuurta Ka-caagan, Xeer Lr: 96/2021

GOLAHA WAKIILADA ARKIIYADA J. SOMALILAND

| Tusmada Qodobada | Arrangment of Sections |
|---|---|
| **QAYBTA KOWAAD**<br>**QODOBO GUUD** | **PART ONE GENERAL** |
| Qodobka 1aad: Magaca Xeerka<br>Qodobka 2aad: Ujeeddada, Dabaqidda iyo Dhaqangalinta Xeerka<br>Qodobka 3aad: Erey Bixin<br>Qodobka 4aad: Noocyada Shirkadaha<br>Qodobka 5aad: Ka hawlgalista Aagga Cashuurta Ka-caagan<br>Qodobka 6aad: Xafiis Diiwaangashan<br>Qodobka 7aad: Diiwaangalinta<br>Qodobka 8aad: Awoodda<br>Qodobka 9aad: Liisamada, Ujuurooyinka iyo Ganaaxyada<br>Qodobka 10aad: Isbedelka Shirkadaha Ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan | Article 1: Short title<br>Article 2: Purpose, application and administration<br>Article 3: Definitions<br>Article 4: Types of legal entities<br>Article 5: Operations in an SEZ<br>Article 6: Registered Office<br>Article 7: Registration<br>Article 8: Capacity<br>Article 9: License, fees and penalties<br>Article 10: Conversion of SEZ Commercial Company |
| **QAYBTA LABAAD:**<br>**SHRKADAHA AAGGACASHUURTA KA-CAAGAN**<br>**Cutubka A:**<br>**Aassaaska iyo Diiwaangalinta Shirkadaha Ganacsiga Aagga Cashuurta Ka-caagan** | **PART TWO:**<br>**SPECIAL ECONOMIC ZONE COMPANIES**<br>**CHAPTER A:**<br>**FORMATION AND REGISTRATION OF SEZ Co** |
| Qodobka 11aad: Saamiileyda Shirkadaha Aaga<br>Qodobka 12aad: Mas'uuliyadda Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan<br>Qodoobka 13aad: Waxyaabaha Shirkaddu ka ganacsianayso<br>Qodobka 14aad: Magaca<br>Qodobka 15aad: Laan Shirkadeed (Baranch Office)<br>Qodobka 16aad: Shirkad Gaar ah<br>Qodobka 17aad: Liisan<br>Qodobka 18aad: Codsiga (Application)<br>Qodobka 19aad: Diiwaangalinta<br>Qodobka 20aad: Xeer-hoosaadka Shirkadda | Article 11: Shareholders of SEZ Cos<br>Article 12: Liability of SEZ Co<br>Article 13: Objects<br>Article 14: Name<br>Article 15: Branch Office<br>Article 16: Private company<br>Article 17: License<br>Article 18: Application<br>Article 19: Incorporation<br>Article 20: Articles of Association |
| **CUTUBKA B. SAAMIYADA** | CHAPTER B: SHARES |
| Qodobka 21aad: Sifooyinka/Dabeecadda Saamiyada<br>Qodobka 22aad: Raasamaalka Saamiga Shirkadda<br>Qodobka 23aad: Raasamaalka Saamiyada waxa lagu bixinayaa Lacagta ahaan<br>Qodobka 24aad: Wax kabedalka Raasamaalka Saamiga<br>Qodobka 25aad:<br>Saamiyadda la wada bixiyay dhammaan | Article 21: Nature of Shares<br>Article 22: Share capital<br>Article 23: Cash consideration for Shares<br>Article 24: Alteration of share capital<br>Article 25: Fully paid up Shares<br>Article 26: Class<br>Article 27: Acquisition of Shares<br>Article 28: No bearer shares<br>Article 29: Share Certificates<br>Article 30: Share Register<br>Article 31: Transfer of Shares |

Qodobka 26aad: Nooca Saamiga (Class)
Qodobka 27aad: IIbsashada Saamiyada
Qodobka 28aad Saamiyada aan Diwaangashanayn
Qodobka 29aad: Shahaadooyinka Saamiga
Qodobka 30aad: Diiwaanka Saamiyada
Qodobka 31aad: Wareejinta Saamiyada
Qodobka 32aad: Isku biiridda Shirkaddaha

**CUTUBKA C:**
**SHURUUDAHA XISAABTA IYO HANTI-DHAWRKA**

Qodobka 33aad: Sanad Maaliyadeedka kowaad
Qodobka 34aad: Warbixinta xisaab xidhka, Faaiidada iyo Khasaaraha
Qodobka 35aad: Xisaab xidh Sannadeedka
Qodobka 36aad: Magacaabidda Hanti-dhawreyaasha
Qodobka 37aad: Doorka Hanti dhawraha
Qodobka 38aad: Gudbinta Xisaab-xidh sannadeedka iyo Warbixinta Hanti-dhawraha

**CUTUBKA D:**
**DAMMAANADDA**

Qodobka 39aad: Awoodda Bixinta Damaanadda
Qodobka 40: Diiwaanka Dammaanadaha

**CUTUBKA E:**
**GUDDIDA AGAASINKA IYO KULAMDOODA**

Qodobka 41aad: Xubnaha Guddiga
Qodobka 42aad: Magacaabidda Guddiga Agaasinka
Qodobka 43aad: Waajibaadyada Guddiga Agaasinka
Qodobka 44aad: Xogahaya
Qodobka 45aad: Diiwaanka Xubnaha Guddiga iyo Xogahaya Shirkadda
Qodobka 46aad Deggenaansho (residence)
Qodobka 47aad: Waxa laga aamini karo Xubnaha Golaha Agaasinka
Qodobka 48aad: Ka qaybgalka Kulamada
Qodobka 49aad: Kulanka Guud ee Sanadlaha ah
Qodobka 50aad: Codsashada shirarka
Qodobka 51: Ogeysiiska Kulanka
Qodobka 52: Qodobo guud oo kulanka iyo codeynta
Qodobka 53aad: Qaraarada
Qodobka 54aad: Matalaada shirarka
Qodobka 55aad: Qaraarada Qoraalka ah
Qodobka 56aad: Wakiilada (Proxies)
Qodobka 57aad: Shirarka Guddiga Agaasinka
Qodobka 58aad: Hadal Qoraalka Shirarka.
Qodobka 59aad: Diwaangalinta Qaraarada Gaarka ah

Article 32: Mergers and amalgamations

**CHAPTER C:**
**ACCOUNTS AND AUDIT REQUIREMENTS**

Article 33: First Financial Year
Article 34: Balance sheet and profit and loss account
Article 35: Annual accounts
Article 36: Appointment of Auditors
Article 37: Role of the Auditor
Article 38: Filing of annual accounts and auditor's report

**CHAPTER D:**
**SECURITY**

Article 39: Power to grant security
Article 40: Security Register

**CHAPTER E:**
**BOARD OF DIRECTORS AND MEETINGS**

Article 41: Directors
Article 42: Appointment of directors
Article 43: Directors' duties
Article 44: Secretary
Article 45: Register of directors and secretary
Article 46: Residence
Article 47: Assumptions in relation to directors
Article 48: Participation in meetings
Article 49: Annual General Meeting
Article 50: Requisition of meetings
Article 51: Notice of meetings
Article 52: General provisions as to meetings and votes
Article 53: Resolutions
Article 54: Representation at meetings
Article 55: Resolutions in writing
Article 56: Proxies
Article 57: Meetings of the board of directors
Article 58: Minutes
Article 59: Filing of Special Resolutions

GOLAHA WAKIILADA J.S. SOMALILAND ARKIIFIYADA

GOLAHA WAKIILADA ARKIIFIYADA SOMALILAND


**CUTUBKA F:**
**KALA-DIRKA SHIRKADDAHA**
Qodobka 60aad: Kala-dirka Shirkadda
Qodobka 61aad: Kala dir Degdeg ah
Qodbka 62aad: Codsiga Kala dirka iyo Qaybinta Hantida
Qodobka 63aad: Saameynta/Cawaaqibka Musalafaadda
Qodobka 64aad: Kala dirista daynleyaasha
Qodobka 65aad: Kulanka Daynleyaasha
Qodobka 66aad: Magacaabidda, Awoodaha iyo waajibaadyada Masuulka Qaabilsan kala Dirista
Qodobka 67aad: Qaybinta Hantida
Qodobka 68aad: Ogeysiinta/Iclaaminta in Shirkaddu kacday ama musalaftay
Qodobka 69aad: Mas'uuliyadda Saamiileyaashii hore iyo Saamiileyda imika/hadda.

**CUTUBKA G:**
**QAYBINTA FAA'IIDADA**
Qodobka 70aad: Faa'iidada Saamiga
QAYBTA **3AAD**
**AASSAASKA MEHERADAHA GANAGSI EE AAGGA CASHUURAHA KA-CAAGAN**
Qodobka 71aad: Qodobada Xeerka ee khuseeya Meheradaha Aagga.
Qodobka 72aad: Saamiileyda Meheradda Aagga Cashuuraha Ka-caagan
Qodobada 73aad: Raasamaalka Saamiga
Qodobka 74aad: Magaca Meheradda Ganacsiga Macaga Meheradd Aagga Ganacsiga
Qodobka 75: Guddiga Agaasinka

**QAYBTA AFRAAD**
**LAAMO GANACSI**
Qodobka 76aad: Qodobada Xeerka ee khuseeya Laamaha Ganancsi
Qodobka 77aad: Aassaasidda Laamo Ganacsi
Qodobka 78aad: Shuruudaha kale ee Aassaaska Laan Ganacsi
Qodobka 79aad: Magaca iyo Hawlaha Ganacsi ee Laanta
Qodobka 80aad: Maareeyaha Laanta
Qodobka 81aad: Bixinta Xogaha Dheeraadka ah

**QAYBTA SHANAAD:**

**CHAPTER F:**
**WINDING UP**
Article 60: Winding up
Article 61: Summary winding up
Article 62: Application of assets and dissolution
Article 63: Effect of insolvency
Article 64: Creditors' winding-up
Article 65: Creditors' Meeting
Article 66: Appointment and powers and duties of liquidator
Article 67: Distribution of property
Article 68: Notification that an SEZ Co is in liquidation
Article 69: Liability as contributories of present and past Shareholders

**CHAPTER G:**
**DISTRIBUTIONS**
Article 70: Dividends

**PART 3:**
**SEZ ESTABLISHMENTS**

Article 71: Applicability of Law to SEZ Establishments
Article 72: Shareholders
Article 73: Share capital
Article 74:
Name of SEZ Establishment
The name of a SEZ Establishment must end with the initials "FZE".
Article 75: Directors

**PART 4:**
**BRANCH OFFICE**
Article 76: Applicability of the Law to Branch Offices
Article 77: Establishment of Branch Offices
Article 78: Additional incorporation requirements
Article 79: Name and business
Article 80: Branch Manager
Article 81: Provision of further information

| AWOODAHA HAY'ADDA | PART 5: POWERS OF THE AUTHORITY |
|---|---|
| Qodobka 82aad: Aassaaska Waaxda Diiwaangalinta<br>Qodobka 83aad: Diiwaan Guud<br>Qodobka 84aad: Xeer-nidaamiyeyaal<br>Qodobka 85aad: Khidmad (Fees)<br>Qodobka 86aad: Tilmaamo (Directions )<br>Qodobka 87aad: Xaqa Fulinta Baadhitaanada<br>Qodobka 88aad:Dhaqangalka Xeerka | Article 82: Establishment of Registration Department<br>Article 83: Public Register<br>Article 84: Regulations<br>Article 85: Fees<br>Article 86: Directions<br>Article 87: Right to carry out inspections<br>Article 88: Effective Date |

ARKIFIYADA
GOLAHA WAKIILADA
JSL SOMALILAND

## QAYBTA KOWAAD:
## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa lagu yeedhaa "Xeerka Aassaaska iyo Diiwaangalinta Shirkadaha Ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-cagan ee Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 96/2021

### Qodobka 2aad
### Ujeeddada iyo Dabaqidda

1) Ujeeddad Xeerkani waa in uu dajiyo hannaan sharci oo u gaar ah aassaasidda iyo diiwaangalinta shirkadaha ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland.
2) Xeerkan waxa lagu dabaqayaa shirkad kasta oo ganacsi oo wadani ama shisheeye ah oo ku leh ganacsi ama ka dhex ganacsata, ama doonaysa inay ku yeelato ganacsi ama ku dhex ganacsato Aagga ganacsiga Cashuurta Ka-caagan oo ku yaal gudaha jamhuuriyadda Somaliland
3) Hay'adda Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland ayaa u xilsaaran dhaqangalinta Xeerkan.

### Qodobka 3aad
### Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa, hadii aan si kale nuxurku u tilmaamin, ereyada iyo weedhaha hoos ku qoran waxay yeelanayaan micnaha halkan lagu siiyey:

1. **Xeer-hoosaadka Aassaaska Shirkadda**: waxa loola jeeda Xeer hoosaadka si waafqsan sharcigan loogu aassaasay Shirkadda Ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan - ama kaabista iyo wax ka-badalka lagu sameeyay- Xeer-hoosaadkaasi.
2. **Hay'adda:** waxa loola jeedda Hay'adda Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Soomaaliland ee loo aassasey si waafaqsan **Xeer Lr. 93/2021**
3. **Laan shirkadeed**: Waxay leedahay macnaha lagu siiyay Qodobka 4aad ee Xeerkan.

## PART 1:
## GENERAL

### Article 1
### Short title/Tittle

This Law shall be cited as "the Law for establishment and registration of commercial companies in special economic zones in the Republic of Somaliland. Law No: 96/2021

### Article 2
### Purpose and Application

1) The purpose of this Law is to set out a legal framework for the establishment and registration of commercial companies in special economic zones in the Republic of Somaliland.
2) This Law applies to any commercial company "foreign or national" which conducts or attempts to conduct business in or from a Special Economic Zone.
3) This Law shall be administered by the Somaliland Special Economic Zones Authority.

### Article 3
### Definitions

The following terms used in this Law shall, unless the context provides other meaing, have the meaning set out below:

1. **"Articles of Association"** in relation to an SEZ Commercial Company, its articles of association as originally adopted or as amended in accordance with this Law
2. **"Authority"** means the Somaliland Special Economic Zones Authority established under Law No. 93/2021
3. **Branch Office** has the meaning given in Article 4 below;

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

| | |
|---|---|
| 4. **Maareeyaha Laan shirkadeed:** waxa uu leeyahay macnaha lagu siiyay Qodobka 80aad ee Xeerkan. | 4. **Branch Manager** has the meaning given in Article 80 below; |
| 5. **Xeerkan**: Waxa loola jeeddaa Xeerka Aassaaska iyo Diiwaangalinta Shirkadaha Ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Soomaliland, Xeer Lr 96/2021 | 5. **This Law** means the Law for establishment and registration of commercial companies in special economic zones in the Republic of Somaliland. Law No: 96/2021 |
| 6. **Shirweyne:** waxa loola jeeddaa shirka /kulanka Saamiileyaasha Shirkad Ganacsiyeed ka diiwaan gashan Aagga Ganacsi Cashuurta Ka-caagan; | 6. **General Meeting** means a meeting of the Shareholders of an SEZ Commercial Company |
| 7. **Qaraar Caadi ah**: waxa loola jeedda qaraar lagu meelmariyay ama ku ansaxay aqlabiyad fudud (hal-dheeri) ee codadka dhammaan saamiileyaasha xaqa u leh in ay shirweyneha shirkaddaasi ka codeeyaan; | 7. **Ordinary Resolution** means a resolution passed by a simple majority of the votes of each Shareholder entitled to vote at a General Meeting; |
| 8. **Qof/cid :** Waxa loola jeedda qof bani'aadami ah, shirkad ama meherad ama hay'ad kale oo sharcigu u aqoonsan yahay shakhsiyad qaanuuniya oo leh xuquuqo iyo wajibaadyo ; | 8. **Person** means any individual, company or other entity which is recognized as a legal person having rights and obligations; |
| 9. **Diiwaanka:** waxa loola jeedda diiwaanka diiwaangalinta Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee ay Waaxda Diiwangalintu u furto una hayso si waafaqsan Xeerkan; | 9. **Register** means the register of SEZ Commercial Companies incorporated under this Law which is maintained by the Registration Department; |
| 10. **Waaxda Diiwangalinta:** waxa loola jeedda Waaxda Hay'adda uga mas'uulka ah haynta Diiwaanka iyo diiwaangalinta Shirkadaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan; | **10. Registration Department** means the department within the Authority responsible for the registration of SEZ Commercial Companies and maintaining the Register; |
| 11. **Xeer-nidaamiye/yaal** (regulations) waxa loola jeedda xeer-nidaamiye ama xeer-nidaamiyeyaasha lagama maarmaanka u ah fulinta Xeerkan ee ay Hay'addu u soo saarto siwaafaqsan xeerkan; | 11. **"Regulations"** means the regulations necessary for the implementation of this Act issued by the Authority from time to time in accordanace with this Act; |
| 12. **Shirkad Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan (SEZ Co):** Waxa ay leedahay macnaha lagu siiyay Qodobka 4aad ee xeerkan; | 12. **SEZ Co"** has the meaning given in Article 4 below; |
| 13. **Meherad Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan (SEZ Enterprise):** waxa uu leeyahay macnaha lagu siiyay Qodobka 4aad ee Xeerkan; | 13. **SEZ Establishment"** has the meaning given in Article 4 below; |
| 14. **Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan:** waxa loola jeedda Xeerka Aagga | 14. **"SEZ Law"** means Law on the establishment of Special Economic |

Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer. Lr. 93/2021

15. **Saami"** waxa loola jeedda saami ka mid ah saamiga raasamaalka ay leedahay Shirkad Ganacsiyeed Aag Cashuuraha Ka-caagan

16. **Saamile** waxa loola jeedda ugu diiwaangashan Diiwaanka in uu yahay Saamiile shirkad gancsiyeed Aag Cashuuraha Ka-caagan.

17. **Diiwaanka Saamiyada:** waxa loola jeedda diiwaanka ku xusan Qodobka 30aad ee Xeerkan

18. **Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan:** waxa loola jeedda Aag ganacsi kasta oo cashuurta Ka-caagan oo loo aassaasey si waafaqsan Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan

19. **Qaraar gaar ah** : waxa loola jeeda qaraarka shirkadeed ku ansaxay cod aan ka yarayn Shan iyo toddobaatan boqolkiiba (75%) codadka dhammaan saamiileyaasha xaq u leh in ay ka codeeyaan Shirweyneha Shirkadda.

20. **Saamiile Gaar ah**: waxa loola jeeda macnaha lagu siiyay Qodobka 72aad (b) ee Xeerkan

**Qodobka 4aad:**
**Noocyada Shirkadaha**

1) Shakhsiyaddaha qaanuuniga ah ee hoos ku taxan ayaa laga aassaasi karaa oo ka hawl gali kara Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan :
   a) Meherad ganacsi leh Mas'uuliyad Xaddidan iyo Saamile qudha "
   b) Shirkad leh dayn xaddidan (Shirkad Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan ); iyo
   c) Laan Shirkad dalka ka diiwaangashan ama laan dalal kale ka diiwaangashan.

-Kuwaasi oo wadajirkoodana loogu yeedhi doono "Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ", mid kooda kaliyana " Shirkad Ganacsiyeed Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan "

2) Shirkadaha Ganacsiga aagga cashuuraha Ka-caagan waxa lagu maamulayaa Xeerka aagga cashuuraha Ka-caagan, Qodobada Xeerkan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama.

Zones of the Republic of Somaliland Law No.93/2021

15. **Share** means a share in the share capital of an SEZ Commercial Company;

16. **Shareholder** means a person entered in the Register as a holder of a Share in an SEZ Commercial Company;

17. **Share Register** means the register maintained in accordance with Article 30;

18. **Special Economic Zones** or **SEZ** means each Special Economic Zone established in accordance with the SEZ Law;

19. **Special Resolution** means a resolution passed by at least seventy five per cent (75%) of the votes of each Shareholder entitled to vote at a General Meeting; and

20. **Unique Shareholder** has the meaning given in Article 72(a).

**Article 4:**
**Types of legal entities**

1) The following legal entities may be established in a Special Economic Zone:
   a) an establishment with limited responsibility and a single shareholder (an **"SEZ Establishment"**);
   b) a limited liability company (an **"SEZ Co"**); and
   c) a branch of an offshore or onshore company (a **"Branch Office"**),

Together, the **"SEZ Commercial Companies"** and each an **"SEZ Commercial Company"**).

2) SEZ Commercial Companies shall be regulated by the SEZ Law, the provisions of this Law and the Regulations.
3) Each SEZ Establishment and SEZ Co incorporated under this Law shall have a

3) Midkasta oo ka mid ah Meheradaha iyo Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee loo aassaaso si waafqsan Xeerkan waxay yeelanaysaa shakhsiyad qaanuuni ah oo ka madaxbanaan Saamiileyaasheedda.

**Qodobka 5aad:**
**Ka hawlgalista Aagga Cashuurta Ka-caagan**

Shirkad kasta oo si sharciya uga diiwaangashan Jamhuuriyadda Somaliland ama dal kale (oo ay ku jiraan shirkadaha shisheeye), ayaa ka hawl-geli kara Aagga Cashuuraha Ka-caagan iyaga oo isu diiwaangelinaya Shirkadaha Ganacsiga ee Aagga ganacsiga Cashuurta Ka-caagan, si waafaqsan shuruudaha xeerkani jideeyay iyo xeer-nidaamiyayaasha ka farcama.

**Qodobka 6aad:**
**Xafiis Diiwaangashan**

1) Dhammaan shirkaddaha Ganacsigu waa in ay xafiis ku yeeshaan Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan ee ay ka diiwaangashanyihiin.

2) Faahfaahinta xafiiska diiwaangashan ee shirkad kasta oo ganacsi, iyo isbedel kasta oo lagu sameeyo xafiiskaasi waa in laga diiwaangaliyo Waaxda Diiwaangalinta.

3) Wareejinta goobta xafiiska diiwaangashan ee Aagga cashuuraha Ka-caagan loo wareejinayo aag kale oo cashuuraha Ka-caagan ma yeelanayso saamayn ah in si shirkad cusub loo aas-aaso. Haseyeeshee wareejintaasi waxay u baahan tahay in la buuxiyo shuruudaha maamul ee ay hay'aadu ku soo saarayso xeer-nidaamiye.

**Qodobka 7aad:**
**Diiwaangalinta**

1) Shirkaddaha Ganacsiga ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan, waxay yeelanayaan shakhsiyad qaanuuni ah marka ay iska diiwaangaliyaan Hay'adda ee lagaliyo diiwaanka.
2) Habraacyada iyo shuruudaha la xidhiidha aassaaska iyo dastuurka ama Xeer-hoosaadka Shirkaddaha Ganacsiga ee Aagga Cashuuraha

separate legal personality from that of its Shareholders.

**Article 5:**
**Operations in an SEZ**

Any entity duly registered in the Republic of Somaliland or outside the Republic of Somaliland (including offshore companies) can operate in an SEZ by incorporating an SEZ Commercial Company in accordance with the requirements of this Law and the Regulations.

**Article 6:**
**Registered Office**

1) All SEZ Commercial Companies must have their registered office located within a Special Economic Zone.
2) Details of each SEZ Commercial Companies' registered office and of any change of registered office shall be recorded by the Registration Department in the Register.
3) The transfer of the location of the registered office of an SEZ Commercial Company from one Special Economic Zone to another Special Economic Zone will not have the effect of creating a new legal entity, however, such transfer will require the completion of certain administrative formalities by the Authority as detailed in the Regulations.

**Article 7:**
**Registration**

1) SEZ Commercial Companies enjoy their legal entity status pursuant to their registration with the Authority and entry into the Register.
2) Formalities and requirements in relation to the incorporation and constitution of an

WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

Ka-caagan waxa loo raacayaa xeer-nidaamiyeyaasha.

SEZ Commercial Company shall be governed by the Regulations.

### Qodobka 8aad: Awoodda

1) Shirkadda ganacsi ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan, waxay yeelanaysaa awooda, xuquuqda iyo mudnaan shaqsi.
2) Ficil kasta oo ay sameyso Shirkad Ganacsi ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan looma weydiin doono su'aal la xidhiidha ansaxnimada iyadoo laga duulayo awood la'aan ku jirta Xeer-hoosaadkeeda ama falka Saamilayda shirkada.

### Article 8: Capacity

1) An SEZ Commercial Company has the capacity, rights and privileges of a person.
2) The validity of an act done by an SEZ Commercial Company shall not be called into question on the ground of lack of capacity by reason of anything in its Articles of Association or by any act of its Shareholders.

### Qodobka 9aad: Liisamada, Ujuurooyinka iyo Ganaaxyada

1) Dhammaan shirkadaha ganacsiga ee Aagga cashuuraha Ka-caagan waxa ku waajib ah in ay u hogaansamaan shuruudaha liisamadooda.
2) Dhammaan shirkadaha ganacsiga Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa ku waajib ah inay bixiyaan ujuurooyinka, tacriifadaha iyo lacagaha kale ee ay Hay'addu u qaado si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha xeerkan ka dheegma.
3) Hay'addu waxay awood u leedahay inay ganaaxdo shirkadaha ganacsiga ee Aagga Cashuuraha Ka-caagan, haddii ay shirkadahaasi ku guul darraystaan inay u hoggaansamaan shuruudaha liisamada ama qodobkasta oo ka mid ah xeerkan ama xeer-nidaamiye ka farcama xeerkan.

### Article 9: License, fees and penalties

1) SEZ Commercial Companies shall at all times abide by the conditions applicable to their license.
2) SEZ Commercial Companies shall pay all fees, tariffs and other charges to the Authority as required pursuant to the Regulations under this act.
3) The Authority shall have the power to issue penalties to SEZ Commercial Companies where an SEZ Commercial Company fails to comply with any condition of its license or any provision of this Law or the Regulations as set out in further detail in the Regulations.

### Qodobka 10aad: Isbedelka Shirkadaha Ganacsi ee Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan

Shirkad kasta ama meherad kasta ee Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, waxay isu beddeli kartaa nooc kale oo ah shirkad ganacsi ama meherad ganacsi, iyadoo ay shardi tahay in isbedelkaasi lagu ansixiyay go'aan gaar ah oo ku salaysan warbixinta hantidhawraha shirkada ee ah in hantida shirkadaasi ama meheraddaasi ay ugu yaraan le'eg tahay raasamaalka saamilayda.

### Article 10: Conversion of SEZ Commercial Company

Any SEZ Co or SEZ Establishment may convert its form into another SEZ Co or SEZ Enterprise, provided that such conversion has been approved by a Special Resolution based on the report of its auditor that the assets of the relevant SEZ Co or SEZ Enterprise are at least equal to its share capital.

## QAYBTA LABAAD:
## SHRKADAHA AAGGA CASHUURTA KA-CAAGAN
### Cutubka A:
### Aassaaska iyo Diiwaangalinta Shirkadaha Ganacsiga Aagga Cashuurta Ka-caagan
### Qodobka 11aad:
### Saamiileyda Shirkadaha Aaga

1) Saamiilaha shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa uu noqon karaa cid kasta oo leh shakhsiyad qaanuuni ah oo lagu aqoonsaday si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Somaliland ama xeer dal kale.
2) Marka laga reebo Meheraddaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, saamiiliyaasha Shirkadaha Aagu kama yaraan karaa laba saamiile.

### Qodobka 12aad
### Mas'uuliyadda Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuurta Ka-caagan

Mas'uuliyadda saamiile kasta oo ka mid ah saamiileyda shirkadaha gancsiga ee aagu, waxay ku kooban tahay saamiga uu ku leeyahay shirkadda.

### Qodoobka 13aad:
### Waxyaabaha Shirkaddu ka ganacsanayso

1) Ujeedooyinka ganacsi ee shirkadaha Aagga, waa in lagu qeexo Xeer-hoosaadka Shirkadda.
2) Ujeedooyinka Shirkadaha ganacsi ee Aaggu waa in ayna ka hor iman Qodobada Xeerka Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, ama Xeer-nidaamiye ka farcama Xeerkaasi.

### Qodobka 14aad.
### Magaca

1) Magaca Shirakadda Aagu waa in uu ku bilawdo ereyga "Shirkadda" marka Af-somali lagu qorayo.
2) Dhammaan macaamilka, heshiisyada, ogaysiisyada, qaansheegaha, xidhiidhada iyo qoraalada daabacan ee Shirakadaha Aagga, waa in lagu muujiyo magaceeda iyo inay tahay shirkad loo aassaasay si waafqasan Xeerkan, oo leh mas'uuliyad dayn xaddidan.

## PART 2:
## SPECIAL ECONOMIC ZONE COMPANIES
### CHAPTER A:
### FORMATION AND REGISTRATION OF SEZ Co
### Article 11:
### Shareholders of SEZ Cos

1) The shareholder of an SEZ Co can be any legal entity recognized under Somaliland law or foreign law.
2) Except for SEZ Establishments, the number of Shareholders in an SEZ Co cannot be less than two.

### Article 12:
### Liability of SEZ Co

The liability of each Shareholder of an SEZ Co is limited to each Shareholder's respective shareholding.

### Article 13:
### Objects

1) The objects of an SEZ Co shall be set out in its Articles of Association.
2) The objects of an SEZ Co shall not contravene any provision of the SEZ Law or the Regulations.

### Article 14:
### Name

1) The name of an SEZ Co must end with the initials "Co" when written in English.
2) In all its dealings, contracts, announcements, invoices, correspondence and printed materials there shall be mentioned next to the name of the SEZ Co that it is formed pursuant to this Law and that its liability is limited.
3) The name of an SEZ Co shall be subject to the prior written approval of the Authority (such approval shall not be unreasonably withheld or delayed).

3) Magaca Shirakadda waxa waajiba in ay marka hore qoraal ku ansaxiyo Hay'adda. Ansixintaasina waa in aan laga haynin ama aan la daahin.
4) Magaca Shirakadda AAagga waxa la badali karaa haddii lagu go'aamiyo qaraar gaar ah, islamarkaana la waafajiyo sida ay dhigayso farqadda 3aad ee Qodobkan.

5) Magaca cusub ee Shirkadda Aagga waa in laga diiwaangaliyo diwaanka loogu talagalay, Waaxda Diwaangalintuna waxay bixin doontaa caddeynta magac bedelidda, caddeyntaasi oo muujinaysa taariikhda magaca cusub la diiwaan galiyay iyo taariikhda magaca cusubi dhaqangalayo.

**Qodobka 15aad:**
**Laan Shirkadeed ( Baranch Office)**

Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan i waxay xaq u leedahay in ay laan ka furato Aag kale oo cashuurta Ka-caagan oo ku yaala Jamhuuriyadda Somaliland ama dal kale.

**Qodobka 16aad:**
**Shirkad Gaar ah**

Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan i waxay noqonaysaa shirkad gaar loo leeyahay, loomana ogolaanayo in ay saamiyadeeda u bandhigto dadweynaha iyada oo bixinaysa saamiyo iwm.

**Qodobka 17aad:**
**Liisan**

Codsiga diiwaangalinta aassaaska shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan waa in lasoo raaciyo codsi liisan lagu socodsiinayo Hay'adda islamarkaana lagu soo lifaaqo dhammaan qoraalada looga baahan yahay ee uu waajibiyo Xeer-nidaamiye.

**Qodobka 18aad :**
**Codsiga ( Application)**

Hay'addu waa in ay ku ogeysiiso codsade kasta go'aanka ay ka qaadato codsiga aassaasidda Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan , ogolaansho ama diidamo hadba ka uu yahay, mudo soddon (30)

4) An SEZ Co may change its name by Special Resolution subject to the approval of the Authority in accordance with Article 14 (3)2) above.

5) The new name of the SEZ Co shall be entered in the applicable Register and a certificate of change of name shall be issued by the Registration Department and each certificate of change of name shall specify, among other things, the date of registration of the new name in the applicable Register, such date being the date on which such new name shall take effect.

**Article 15:**
**Branch Office**

An SEZ Co shall be permitted to open a branch office in another Special Economic Zone in the Republic of Somaliland or outside the country.

**Article 16:**
**Private company**

The SEZ Co shall be a private company and shall not be permitted to offer any of its shares to the public by way of any subscription of shares, stock, debentures or debenture stock.

**Article 17:**
**License**

The application for the creation of an SEZ Co must be accompanied by an application to the Authority for a license to operate in the relevant Special Economic Zone together with all other documentation as set out in the Regulations.

**Article 18:**
**Application**

The Authority shall notify each applicant of the Authority's decision as to whether or not permission is granted for the formation of any SEZ Co (including any conditions to such permission being granted) within thirty (30)

GOLAHA WAKIILADA ARKIIFIYADA SOMALILAND

maalmood gudahooda oo ka bilaabmaysa taariikhda waaxda Diiwaan-gelintu heshay codsi uu si sax ah oo dhamaystiran u soo buuxiyay codsadahu ama wakiilkiisu lana socdaan dhammaan macluumaadka kale iyo qoraalada Hay'addu u baahato si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha. Hadii ay ogolaato codsiga, ogeysiisana go'aanka ogolaanshiyaha ah ee waaxdu siinayso codsadaha waa in ay ku sheegto shuruudaha ku xidhan ogolaanshiyahaasi ay bixisay

**Qodobka 19aad:**
**Diiwaangalinta**

1) Hay'addu marka ay ogolaato codsiga diiwangalinta aassaaska Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan , kuna qanacdo in la wada bixiyay dhammaan saamiyada raasamaalka shirkadda la aassaasayo, waxay amraysaa in diiwaanka lagaliyo dhammaan xogta khusaysa shirkadda la aassaasayo; waxayna isla marakaasi waaxdu:
   a) siinaysaa codsadaha shahaadada diwaangalinta shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan oo ay bixisay Hayadda ama cid ay u igmatay;
   b) Siinaysaa Shirkadda la diiwaan galiyay Lambar diiwaangalineed gaar u ah shirkadaasi.

2) Shahaaddo kasta oo diwaangalineed waa in laga helo waxyaabahan socda:
   a) Magaca shirkadda Aagga;
   b) Taariikhda diiwaangalinta shirkadda; iyo
   c) Lambarka u gaarka ah ee la siiyay shirkaddda.

**Qodobka 20aad**
**Xeer-hoosaadka Shirkadda**

1) Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan ee loo aassaasay si waafaqsan Xeerkan waa in ay lahaato Xeer-hoosaadka Shirkadda, kaasi oo laga diiwangalinayo Waaxda Diiwangalinta Shirkadaha Aagga ganacsiga Cashuurta Ka-caagan.
2) Shirkadda Aagga waxa u bannan in ay qaataan oo xeer-hoosaad ka dhigtaan Xeer-hoosaadka shirkadaha ee ay Hay'addu diyaariso una faafiso si waafaqsan xeer-nidaamiye.
3) Xeer-hoosaadka aassaaska Shirkadda Aagu waa in uu sheego dhammaan arrimaha iyo xogaha

days of receipt by the Registration Department of a valid application form from an applicant which has been duly completed and executed by or on behalf of the applicant, together with all such other information and documentation as the Authority as may be required pursuant to the Regulations or otherwise.

**Article 19:**
**Incorporation**

1) Upon permission being granted by the Authority for the formation of a SEZ Co and the Authority being satisfied that the relevant share capital of the SEZ Co to be formed has been fully paid up, the Authority shall cause all relevant details concerning such SEZ Co to be entered in the Register and on the incorporation of an SEZ Co shall:
   a) issue a certificate of incorporation, duly executed by or on behalf of the Authority, to the applicant; and
   b) Assign to the SEZ Co a unique registration number.
2) Each certificate of incorporation shall specify, amongst others,
   a) the name of the SEZ Co;
   b) the date of registration of such SEZ Co in the Register; and
   c) the unique company number assigned to the SEZ Co.

**Article 20**
**Articles of Association**

1) Each SEZ Co incorporated under this Law shall have an Articles of Association which shall be filed with the Registration Department on incorporation of the SEZ Co.
2) An SEZ Co may elect to adopt standard articles of association as published by the Authority pursuant to the Regulations.
3) An SEZ Co's Articles of Association shall contain all matters required to be included by this Law or the Regulations and such other matters as the Shareholders wish to include in the Articles of Association,

xeerkan ama xeer-nidaamiye waajibiyay in lagu sheego Xeer-nidaamiyaha Shirkadda iyo arrimaha kale ee saamiileyaashu u gartaan in lagu daro Xeer hoosaadka, waxase shardi ah in aanu xeer hoosaadka Shirkadda ka hor iman Qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha.

4) Xeer-hoosaadka Aassaaska Shirkadda waxaa wax lagaga bedeli karaa qaraar gaar ah; wax ka bedelkaasna waa in ay si degdeg ah Shirkaddu uga diwaangaliso Waaxda Diwaangalinta ee Hay'adda.

## CUTUBKA B. SAAMIYADA

### Qodobka 21aad:

### Sifooyinka/Dabeecadda Saamiyada.

Iyadoo la raacayo Xeer hoosaadka Shirkadda, saami kasta waxa ka dhalanaya ama uu xambaarsanaaanayaa:

a) Xaqa codaynta oo ah xaq uu saamiiluhu u yeelanayo in uu ka codeeyo shirarka Shirkadda.
b) In saamiiluhu dan/maslaxad u dhiganta saamigiisa ku yeesho Shirkadda; iyo
c) In uu la darajo yahay saamiyada kale ee saamiyada ay isku midka yihiin ee Shirkadda.

### Qodobka 22aad.

### Raasamaalka Saamiga Shirkadda

1) Raasamaalka Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan waxa loo qaybinayaa saamiyo qiime ahaan is le'eg oo saami kastaa leeyahay lambar gaar u ah iyo qiimo go'an oo ugu yaraan ah 1 Doolarka Maraykanka ama qiime u dhigma oo Shillinka Soomaliland ah.
2) Shirkadda Aagga waxa ka reeban in ay bixiso ama yeelato saami qiimiisu ka hooseeyo qiimaha go'an ee saamiyadeeda.
3) Raasamaalka Shirkadda Aagga waa in uuna ka yaraanin $10,000 ama qiimo u dhigma oo Shillinka Soomailand ah, waana in isla marka la'aassaaso Shirkadaasi dhammaan raasamaalkeedu noqdo mid ku jira gacanteeda.

### Qodobka 23aad.

### Raasamaalka Saamiyada waxa lagu bixinayaa Lacaga ahaan.

Haddii ayna ogolaansho ka haysan Hay'adda, uma bannaana shirkadda in ay ka aqbasho saamiilyaasheeda in guud ahaan ama qayb ahaan saamiyadooda

provided always that the Articles of Association shall not contain a provision which is contrary or inconsistent with this Law or the Regulations.

4) An SEZ Co's Articles of Association may be amended by Special Resolution and any amendment shall be promptly filed by the SEZ Co with the Registration Department.

## CHAPTER B: SHARES

### Article 21:

### Nature of Shares

Subject to the Articles of Association, each Share shall:

a) carry the right to vote at a meeting of the SEZ Co;
b) represent a proportionate interest in the SEZ Co; and
c) Rank in all respects equally with each other Share of the same class of Shares in the SEZ Co.

### Article 22:

### Share capital

1) The capital of each SEZ Co shall be divided into Shares of equal value and each Share shall be numbered and shall have a minimum nominal value of US dollars 1, or its equivalent in Somaliland shilling.
2) A Share may not be allotted by an SEZ Co at less than its nominal value.
3) The minimum share capital requirement of an SEZ Co shall be US$ 10,000 or its equivalent in Somaliland shilling and shall be fully paid up on incorporation.

### Article 23:

### Cash consideration for Shares

An SEZ Co shall not, except with the Authority's prior approval, allot and issue Shares as paid up (in full or in part) other than for cash consideration.

raasamaalka shirkadda ku bixiyaan qaab kale oon ahayn lacagnimo.

**Qodobka 24aad:**
**Wax kabedalka Raasamaalka Saamiga**

1) Raasamaalka saamiyada waxa wax lagaga bedeli karaa qaraar gaar ah, haddii uuna Xeer-hoosaadka aassaaska Shirkaddu mamnuucin ama ayna ka hor imanayn shuruudaha raasamaalka saamiga ugu yar ee xeerkan lagu sheegay.
2) Guddiga Agaasinka ee Shirkadda ayaa awood u leh in ay qoondeeyaan saamiyada Shirkadda, haddii awooddaas lagu siiyay Xeer-hoosaadka aassaaska Shirkadda ama qaraar gaar ah.
3) Isbedel kasta oo lagu sameeyo raasamaalka shirkadda waa in si dhakhso ah looga diiwaangaliyo Waaxda Diiwaangalinta, wuxuna dhaqangalayaa oo kaliya marka la diwaangaliyo.

**Qodobka 25aad:**
**Saamiyadda la wada bixiyay dhammaan**

Saami ka mid ah saamiyada shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan cidi ma yeelan karto ilaa la wada bixiyo dhammaan raasamaalka shirkadda.

**Qodobka 26aad:**
**Nooca Saamiga ( Class)**

Haddii ayna ansixin Hay'addu ama uuna ogolayn Xeer hoosaadka Assaska Shirkaddu, dhamman saamiyada Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waa in ay noqdaan saamiyo isku nooc ah.

**Qodobka 27aad:**
**Ilbsashada Saamiyada**

1) Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan ma iibsan karto Saamiyadeeda
2) Shirkaddu waxa u bannaan in ay si waafaqsan xeerarka khuseeya u iibsato ama u yeelato saamiyada Shirkadda Aagga ama Meherada Aagga.

**Qodobka 28aad**
**Saamiyada aan Diwaangashanayn**

Saami aan diwaangashanayn loo soo saari maayo shahaado

**Qodobka 29aad**
**Shahaadooyinka Saamiga**

Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan waa in, muddo afar iyo toban (14) casho gudahood ah oo ka

**Article 24:**
**Alteration of share capital**

1) The share capital of an SEZ Co may be altered by Special Resolution, unless prohibited by its Articles of Association or if such alteration would result in the contravention of the minimum share capital requirements set out in this Law.
2) The Board of directors may exercise the power of the SEZ Co to allot Shares if they are authorized to do so by its Articles of Association or by Ordinary Resolution.
3) Any alteration to the share capital of an SEZ Co shall be promptly recorded in the Register and shall only take effect from the date of such registration.

**Article 25:**
**Fully paid up Shares**

No shares in a SEZ Co may be issued unless the capital of SEZ Co is fully paid.

**Article 26:**
**Class**

Unless otherwise approved by the Authority or authorized pursuant to its Articles of Association, all shares issued by an SEZ Co shall be of the same class.

**Article 27:**
**Acquisition of Shares**

1) No SEZ Co may acquire its own shares.
2) An SEZ Co may own shares in another SEZ Co or SEZ Establishment subject to complying with all applicable laws.

**Article 28:**
**No bearer shares**

No Shares shall be issued in bearer form.

**Article 29:**
**Share Certificates**

Each SEZ Co shall complete and issue a share certificate to the Shareholders in respect of all

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA J.S. SOMALILAND

GOLAHA WAKILADA
ARKIFIYADA
SOMALILAND

bilaabanta taariikhda qoondeynta saamiyada Saamiile kasta ku leeyahay shirkadda ama taariikhda cid la wareegto saami, ay ku diyaariso kuna siiso mid kasta oo ka mid ah saamiileyaasheeda shahaadada saamiga oo muujinaysa tirada saamiyada uu ku leeyahay saamiga shirkadda.

**Qodobka 30aad:**
**Diiwaanka Saamiyada**

1) Shirkad kasta oo ka mid ah shirkadaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan , waa in ay yeelato diwaanka Saamiyada, kaasi oo lagu diiwaangalinayo;
   a) Magacyada iyo ciwaanada saamiileyaasha, iyo saamiyada uu mid kastaa leeyahay ;
   b) Taariikhda qofkaasi loo diiwaangaliyay saamiilenimo; iyo taariikhda Saamilahaasi ka baxay shirkadda;
   c) Taariikhda ay wax ku kordheen ama ka dhinmeen saamiyada saamiile, haddii ay jirto ; iyo
   d) Xog kasta oo kale oo Xeer-nidaamiye waajibiyo in la galiyo diiwaanka saamiyada.
2) Is bedel kasta oo lagu sameeyo Diiwaanka Saamiyada ee Shirkadda Aaggu waa in lagu wargalinayo lagana diiwaangaliyo Waaxda Diiwaangalinta.

**Qodobka 31aad:**
**Wareejinta Saamiyada**

1) Wareejinta saami ka mid ah saamiyada Shirkadaha Aaggu dhaqangal noqonmayso ilaa cidda la wareegtey saamigu uu qoraalka rasmiga ah ee kala wareejinta saamiyadaasi u gudbiyo Xoghaya shirkadda,
2) Marka lala kala wareego saami ka mid ah saamiyadeeda, Shirkadda waxa waajib ku ah in si dhakhso ah ay Diiwaanka Saamiyada u galiso saamiga lala kala wageegey, iyo magaca iyo faahfaahinta cidda saamiga la wareegtay oo ay sidoo kalena Waaxda Diiwaangainta ku wargaliso kala wareejinta saamigaasi.
3) Wareegidda saamigu dhaqangal noqonmaayo ilaa la galiyo diiwaanka saamiyada.
4) Xeer-hoosaadka Aassaaska Shirkadda Aaggu waxa uu dhigi karaa qodob Saamiileyda shirkadda

Shares held by them in such SEZ Co within fourteen (14) days of the allotment of any Shares or the date on which a transfer of any Shares has been completed.

**Article 30:**
**Share Register**

1) Each SEZ Co shall establish and maintain a Share Register and promptly enter in it:
   a) the names and addresses of its Shareholders, together with a statement of the Shares held by each Shareholder;
   b) the date on which each person was registered as a Shareholder and the date on which any person ceased to by a Shareholder;
   c) the date on which the number of Shares held by any Shareholder increased or decreased; and
   d) any other information prescribed by the Regulations.
2) Any changes to the Share Register maintained by the SEZ Co shall be notified to the Registration Department.

**Article 31:**
**Transfer of Shares**

1) Any purported transfer of any Share in any SEZ Co shall be invalid unless a duly executed instrument of transfer has been delivered to the SEZ Co's secretary by the transferee.
2) The SEZ Co shall promptly register any transfer in its Share Register setting out the name and details of the transferee and file a notice of transfer of shares with the Registration Department
3) No share transfer shall be effective until the date of registration thereof in the Share Register.
4) An SEZ Co's Articles of Association may contain pre-emption rights in favour of the existing Shareholders.

siinaya **Xaqa xuquuq Iibsiga** (preemption rights).

**Qodobka 32aad.**
**Isku biiridda Shirkaddaha**

Isku dar kasta ama midow kasta waxa uu dhaqangal ku noqonayaa marka lagu ansixiyo qaraar gaar ah.

**CUTUBKA C:**

**SHURUUDAHA XISAABTA IYO HANTI-DHAWRKA**

**Qodobka 33aad:**
**Sanad Maaliyadeedka kowaad**

Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxay yeelanaysaa sannad xisaabeed ka bilaambi doona 1da bisha Janawari ee sannadka kasta kuna eg' 31ka Bisha Disember ee isla sanad kasta. Haseyeeshee, sannad xisaabeedka ugu horeeya ee shirkaddu wuxuu ka bilaabmi doonaa taariikhda la diiwaanngaliyo shirkadda, wuxuuna ku ekaanayaa 31ka bisha December ee isla sannadkaas la-diiwaangaliyay.

**Qodobka 34aad:**
**Warbixinta xisaab xidhka, Faaiidada iyo Khasaaraha**

1) Guddiga Agaasinka ee Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa uu diyaarinayaa warbixinta xisaabaadka shirkadda ee faa'iiddada iyo khasaaraha maalinta u danbeysa sanad maaliyadeedka.
2) Waxa waajib ah in warbixin xisaabeedka shirkadda ee faaiidada iyo khasaaraha uu saxeexo xubin ka mid ah Guddiga Maamulku ugu yaraan.

**Qodobka 35aad:**
**Xisaab xidh Sannadeedka**

1) Guddiga Agaasinka ee shirkaddaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, waxa ay diyaarinayaan xisaab xidhka Shirkadda sanad kasta.
2) Xisaab xidh sannadeedka shirkadda waxa loo diyaarinayaa si waafaqsan mab'aadiida Xisaabaadka (accounting Princiles) ama qaabka

**Article 32:**
**Mergers and amalgamations**

Any merger or amalgamation shall only be effective upon the passing of a Special Resolution.

**CHAPTER C:**

**ACCOUNTS AND AUDIT REQUIREMENTS**

**Article 33:**
**First Financial Year**

Each SEZ Co shall have a financial year beginning on the 1 January of each calendar year and ending on 31 December of such year, provided that the first financial year shall begin on the date of its registration as set out in its certification of incorporation and end on 31 December.

**Article 34:**
**Balance sheet and profit and loss account**

1) The board of directors of each SEZ Co shall prepare for each financial year of the SEZ Co a balance sheet as at the last day of its financial year and a profit and loss account.
2) At least one director shall be required sign the balance sheet and profit and loss account of the SEZ Co.

**Article 35:**
**Annual accounts**

1) The directors of every SEZ Co shall cause accounts to be prepared in relation to each financial year of the SEZ Co.
2) The accounts shall be prepared in accordance with accounting principles or standards prescribed in the Regulations or otherwise approved by the Registration Department and shall

uu dajiyo Xeer-nidaamiye ama qaabka kale ee ay ogolaato Waaxda Diiwaangalintu; waana in xisaab xidhku ku dhisnaado run iyo caddaalad, si cadna u muujiyaa faa'iidada ama khasaaraha shirkadda ee sannad maalyadeedkaas iyo xaaladda dhaqaale ee shirkadda sanadkaas.

3) Xisaab xidhka sanadka ee Shirkadda waxa ansixiyana Guddiga Agaasinka ee Shirkadda, iyaga ama cid ay wakiisheen baana saxeexaysa.
4) Warbixin sanadeedka oo ay la socoto warbixinta hantidhawrku waxa loo gudbinayaa saamiileyaasha si ay u ansixiyaan.

**Qodobka 36aad:**
**Magacaabidda Hanti-dhawreyaasha**

ShirkaddaAaagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxay hanti-dhawre ka dhex magacaabaysaa liiska hanti-dhawreyaasha ay aqoonsan tahay Hay'addu.

**Qodobka 37aad:**
**Doorka Hanti dhawraha**

Hanti-dhawre kasta oo ay Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan u magacawday si waafqasan Qodobka 36aad ee Xeerkan waxa uu baadhayaa xisaabaadka sanadlaha ah ee Shirkadda, wuxuuna warbixin baadhitaan ka diyaarinayaa runnimada iyo saxnimada warbixinta xisaabaadka shirkadda ee sannadkaas.

**Qodobka 38aad:**
**Gudbinta Xisaab-xidh sannadeedka iyo Warbixinta Hanti-dhawraha**

Shirkaddaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waa in, kadib marka ay ansaxiyaan Saamiileyda Shirkadu, nuqul warbixinta xisaab xidh sanadeedka ah oo ay la socoto warbixinta hantidhawrku u gudbiso Waaxda Diwaangalinta.

**CUTUBKA D:**
**DAMMAANADDA**
**Qodobka 39aad:**
**Awoodda Bixinta Damaanadda**

1) Saamiileydu waxay xaq u leeyihiin in ay saamigooda gabi ahaan ama qayb ahaan ku damiintaan dayn qabe kuna damaanad qaadaan

show a true and fair view of the profit or loss of the SEZ Co for the relevant financial year and of the state of the SEZ Co's affairs at the end of such financial year

3) The annual accounts of each SEZ Co shall be approved by its directors and signed by or on behalf of the directors.
4) The annual accounts together with the auditor's report shall be submitted to the Shareholders for approval.

**Article 36:**
**Appointment of Auditors**

The SEZ Co shall appoint an auditor from the list of auditors accredited by the Authority to audit the annual accounts.

**Article 37:**
**Role of the Auditor**

Each auditor appointed by an SEZ Co pursuant to Article 36, shall examine and prepare a report on the annual accounts of the SEZ Co which shall, amongst others, certify the trueness and fairness of the annual accounts.

**Article 38:**
**Filing of annual accounts and auditor's report**

The SEZ Co must send a copy of the annual accounts and auditors report to the Registration Department upon their approval by the Shareholders.

**CHAPTER D:**
**SECURITY**
**Article 39:**
**Power to grant security**

1) The Shareholders shall be entitled to grant security over all or part of their Shares in any SEZ Co to any creditor to secure the payment of an existing or future debt of the Shareholders.

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

bixinta dayn lagu leeyahay ama lagu yeelan doono saamiileyda.

2) Shiraddaha waxa ay bixin kartaa damaanad, balanqaad bixin dayneed, balanqaad ama wareejin daymeed, ama heshiis guud ama mid gaar ahaaneed oo lagu sheegay xeerarka Somaliland si loo damaanad qaado bixinta daymo taagan ama kuwo mustaqbalka ah.

**Qodobka 40:**
**Diiwaanka Dammaanadaha**

1) Shirkaddaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxay yeelanaysaa diiwaan ay ku kaydiso kuna xafido dhammaan damaanadaha ay shirkaddu bixisay ee ku saabsan hantideeda iyo wixii damaanad ah ee kale ee ay ku bixisay dhammaan ama qayb ahaan saamiyadda Shirkadda.
2) Diiwaanka Dammanaddaha waxa lagu diiwaangalinayaa magacyada iyo ciwaanada daynlayaasha, iyo faahfaahinta dammaanadda la dhigay.

**CUTUBKA E:**
**GUDDIDA AGAASINKA IYO KULAMADOODA**
**Qodobka 41aad:**
**Xubnaha Guddiga**

1) Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, waxay yeelanaysaa Guddiga Agaasin oo ka kooban laba xubnood ugu yaraan.
2) Tiradda xubnaha Guddiga Agaasinka waxa cayimaya Xeerka Shirkadda.
3) Qofna kama mid noqon karo Golaha Agaasinka haddii:
    a) da'diisu ka yar tahay 18 jir;
    b) aanu ahayn qof dabiici ah;
    c) Uu xukun maxkamdeed oo ku dhacay shantii sanno ee u dambaysay, ka reebayo in uu xubin ka noqdo Guddiga Agaasinka Shirkadda.

**Qodobka 42aad:**
**Magacaabidda Guddiga Agaasinka**

1) Saamileyda aassasay shirkadda ayaa magacaabaya xubnaha Guddiga Agaasinka Shirkadda ee kowaad; intaa wixii ka dambeysana Saamiileyda ayaa Qaraar caadi ah

2) An SEZ Co may give any guarantee, hypothecation, pledge or delegation of debt or private or public contracts provided for in the law of Somaliland to secure the payment of an existing or future debt of the SEZ Co.

**Article 40:**
**Security Register**

1) Each SEZ Co shall keep at its registered office a register of all security granted by an SEZ Co over its assets and any security granted over all or part of the Shares of an SEZ Co.

2) The security register shall contain the name and address of the creditors and a description of the security.

**CHAPTER E:**
**CHAPTER E**
**BOARD OF DIRECTORS AND MEETINGS**
**Article 41:**
**Directors**

1) Each SEZ Co shall have at least two directors.
2) The number of directors shall be fixed by the Articles of Association.
3) No person shall be a director who is:
    a) under the age of 18 years;
    b) not a natural person; or
    c) Disqualified from being a director by virtue of having been convicted of a criminal offence in any jurisdiction in the past 5 years.

**Article 42:**
**Appointment of directors**

1) The first directors of an SEZ Co shall be elected by the Shareholders incorporating the SEZ Co and thereafter directors shall be elected by Shareholders passing an

ama si waafaqsan Xeer-hoosaadka aassaaska shirkada ku dooranaya xubnaha Guddiga Agaasinka, muddo xileedkooda cayimaya.

2) Xubin kastaa waxa ay xika haynaysaa ilaa laga bedelayo, ka geeriyoonayo, iska casilayo ama qaaraar gaar aha ama si waafaqsan Xeerka Shirkadda xubinimada looga qaadayo.

3) Xeer-hoosaadka shirkadda, ayaa lagu sheegi karaa shuruudo dheeraad ah oo la xidhiidha magaabista, muddo xileedka, iscasilaadda iyo eryidda xubnaha Guddiga Agaasinka.

4) Isbedal kasta oo lagu sameeyo xubnaha Guddiga Agaasinka Shirkadda waxa si dhakhso ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha loogu wargalinayaa Waaxda Diiwaangalinta.

**Qodobka 43aad:**
**Waajibaadyada xubnaha Guddiga Agaasinka.**

1) Xubin kasta oo ka tirsan Guddigaa Agaasinka ee Shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan , waxa ay:
   a) U dhaqmaysaa si waafaaqsan Xeer-hoosaadka shirkadda;
   b) Waxayna Fulinaysaa oo kaliya awooddaha iyo waajibaadka xeer-hoosaadkan lagu siiyay.
2) Xubin kasta oo ka tirsan Guddigaa Agaasinka Shirkadda, waxa ku waajib ah in uu hawlaha shirkadda u fuliyo sida uu isleeyahay waxay kor u qaadaysaa guulaha shirkadda iyo faaiidada saamiilayda guud ahaan isaga oo niyadsan; si uu ujeedkaasi u gaadhona, waxa looga baahan yahay in uu tixgaliyo ama fiiro gaar ah siiyo arimaha ay ka mid yihiin kuwan soo socdaa:
   a) Saamaynta go'aan kastaa yeelan karo mustaqbalka fog;
   b) Danaha/maslaxadda shaqaalaha Shirkadda;
   c) Adkaynta iyo horumarinta xidhiidka ganacsi ee Shirkaddu la leedahay macaamiisheeda iyo ciddaha ay ganacsi kula jirto;

Ordinary Resolution, or as otherwise provided in the Articles of Association, for such term as the Shareholders may determine.

2) Each director shall hold office until his successor takes office or until his earlier death, resignation, removal following disqualification or removal by Ordinary Resolution or as otherwise provided in the Articles of Association.
3) The Articles of Association may stipulate further conditions relating to the nomination, term of appointment, resignation, term and dismissal of directors.
4) Any change to an SEZ Co's directors shall be promptly notified to the Registration Department in accordance with the Regulations.

**Article 43:**
**Directors' duties**

1) A director of an SEZ Co shall:
   a) act in accordance with the Articles of Association; and
   b) Only exercise his powers for the purposes for which those powers have been conferred.
2) A director of an SEZ Co shall act in the way he considers, in good faith, would be most likely to promote the success of the SEZ Co for the benefit of its Shareholders as a whole, and in doing so, have regard, amongst other matters, to:
   a) the likely consequences of any decision in the long term;
   b) the interests of the SEZ Co's employees;
   c) the need to foster the SEZ Co's business relationships with suppliers, customers and others;
   d) The impact of the SEZ Co's operations on the community and the environment.

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

d) Saamaynta fulinta hawlaha shirkaddu ku yeelan karto bulshada iyo deegaanka
e) dhawrista sumcadda iyo heerarka hab dhaqnka ganacsi ee shirkadda; iyo
f) Mudnaanta dhex u ahaanshaha saamiileyda Shirkadda;

3) Haseyeeshee, tixgalinta arimahaasi kor ku xusani kama reebayaan xubnaha Guddiga Agaasinka dhawrista iyo dabaqidda xeerarka khuseeya Shirkaddaha Aagga ee dhigaya xaalado gaar ah oo ku waajibinaya xubnaha inay tixgaliyaan ama horeysiiyaan fulinta danta cid dayn ku leh Shirkadda.
4) Xubinta Guddiga Agaasinka ee Shirkadda Aagga, waxa ku waajib ah in uu la yimaaddo oo muujiyo taxadirka (care), xirfadda iyo xilksanimoda (deligenece) laga filayo in uu layimaado qof xil-kas ah oo leh:
   a) Aqoon guud, xirfad iyo waayo aragnimda laga filayo in uu lahaado qof haya xil la mid ah kuwa xubintu u hayso Shirkadda; iyo
   b) Aqoonta guud, xirfadda iyo waayo aragnimada uu leeyahay xubinka Guddigu.
5) Iyadoo la raacayo Xeer-hoosaadka Shirkadda xubinka Guddiga Agaasinak Shirkadda Aagga, waxa waajib ku aha in uu ka fogaado xaalad kasta oo uu si toos ah ama si dadban ugu leeyahay ama ugu yeelan karo dan ama danno khilafsan, ama u muuqata in ay khilaafsan tahay, danaha Shirkadda.
6) Xubinta Guddiga Agaasinka Shirkadda Aagga , waxa ka reeban ama ka mamnuuc ah in uu cid kale ka qaato ama aqbalo deeq, hadyad ama wax kale oo faa'iido leh haddii lagu siiyay:
   a) Xilka xubinimada ee uu u hayo shirkadda dartiis; ama
   b) Si uu u fuliyo ama si uuna u fulin hawl ama waajibaadkiisa xubinnimo

Marka laga reebo xaaladaha aqbalitaanka faaiidooyinkani keenayn is khilaaf daneed.

**Qodobka 44aad:**
**Xogahaya**

e) the desirability of the SEZ Co maintaining a reputation for high standards of business conduct; and
f) the need to act fairly as between Shareholders of the SEZ Co,

3) Subject to any law applicable to the SEZ Co which requires directors, in certain circumstances, to consider or act in the interests of an SEZ Co's creditors.
4) A director of an SEZ Co shall exercise the care, skill and diligence that would be exercised by a reasonably diligent person with:
   a) the general knowledge, skill and experience that may reasonably be expected of a person carrying out the functions carried out by the director in relation to the SEZ Co; and
   b) the general knowledge, skill and experience that the director has.
5) Subject to the Articles of Association, a director of an SEZ Co shall avoid a situation in which he has, or can have, a direct or indirect interest that conflicts, or may possibly conflict, with the interests of the SEZ Co.
6) A director of an SEZ Co shall not accept a benefit from a third party where the benefit is conferred on him:
   a) due to his position as a director of the SEZ Co; or
   b) for him doing (or not doing) anything as a director,

Unless the acceptance of such benefit cannot reasonably be regarded as likely to give rise to a conflict of interest.

**Article 44:**
**Secretary**

1) Shirkad kastaa waxay magacaabaysaa hal qof ama in ka badan oo noqda Xoghayaha Shirkadda.
2) Isbedal kasta oo lagu sameeyo Xoghayeyaasha shirkadda waa in si degdeg ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiye loogu wargaliyo lagana diiwaangaliyo Waaxda Diiwaangalinta

1) Each SEZ Co shall appoint one or more persons to act as the secretary of the SEZ Co.
2) Any change to an SEZ Co's secretaries shall be promptly notified to the Registration Department in accordance with the Regulations.

**Qodobka 45aad:**
**Diiwaanka Xubnaha Guddiga iyo Xogahaya Shirkadda**

1) Shirkad kastaa waxay yeelanaysaa oo xafiiskeeda ku haynaysaa Diiwaanka Guddiga Agaasinka iyo Xoghayeyaasha.
2) Diiwaanka waxa lagu diiwaan galinayaa macagyada, faahfaahinta iyo ciwaanada xubnaha Guddiga Agaasinka iyo Xogahayaha Shirkadda; Isbadal kasta oo ku dhaca ama lagu sameeyo Xubanaha Guddiga Agaasinka ama Xoghayaha shirkadana waxa si dhakhso ah loogu diiwaangalin doona diiwaanka.

**Article 45:**
**Register of directors and secretary**

1) Every SEZ Co shall maintain at its registered office a register of its directors and secretaries.
2) The register shall contain details of the identity and address of the directors and secretaries and shall be promptly updated from time to time to reflect any changes to the directors or secretaries.

**Qodobka 46aad**
**Deggenaansho ( residence)**

Waxa waajib ah in gu yaraan hal xubin oo ka mid ah xubnaha Guddiga Agaasinku ama Maareeyaha guud ee Shirkaddu uu yahay qof deggan oo ku sugan Somaliland snnadka oo dhan ama ugu yaraan 180 maalmood sannadkii.

**Article 46:**
**Residence**

At least one of the directors of an SEZ Co or its general manager shall be required to reside in the Republic of Somaliland for at least 180 days in any calendar year.

**Qodobka 47aaad:**
**Waxa laga aamini karo Xubnaha Golaha Agaasinka.**

1) Qofka la macaamilaya Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan wuxuu qof kasta oo Agasin ama xoghaye shirkadaasi ugaga diiwaangashan shirkadaasi ama buuga Diiwaangalinta Shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan u aamini doonaa in qofkaasi;
   a) yahay xubin ama xoghaye si sharci ah shirkaddaasi u magacaabatay; iyo
   b) uu leeyahay awoodaha uu ku fuliyo waajibaadyada ama hawlaha uu u xilsaaran yahay xubint ama xoghayeha

**Article 47:**
**Assumptions in relation to directors**

1) A person dealing with an SEZ Co is entitled to assume that anyone who appears, from the information that is available to the public on the Register, or the registers maintained by the SEZ Co, to be a director or secretary of the SEZ Co:
   a) has been duly appointed; and
   b) has authority to exercise the powers and perform the duties customarily exercised or performed by a director or secretary of a similar entity.

GOLAHA ... ARKIFIYADA ... SOMALILAND

guud ee shirkad lamid ah shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan

2) Qofna xaq uma laha in uu ku camal falo aaminaada ku xusan Qodobka 47 (1aad), hadii uu goorta uu lamacaamilayay Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan uu ogyahay ama ay ahayd in u ogaado in aaminaadissaasi qalad tahay.

2) A person is not entitled to make an assumption under Article 47(1aad) above, if at the time of the dealing with the SEZ Co such person knew or could have reasonably suspected that the assumption was incorrect.

## Qodobka 48aad: Ka qaybgalka Kulamada

1) Iyadoo la raacayo Xeer-hoosaadka shirkadda, saamiiluhu waxa uu xaq u leeyahay in uu kulamada saamiileyda kaga qayb galo taleefan ama qaab kasta oo kale oo isgaadhsiineed oo si fiican oo loo maqli karo u gaadhsiin karra codkiisa dhammaan saamilliyaasha kulanka fadhiya, islamarkaana saamiile kasta oo kulanka fadhiyaa u tixgaliso in saamilahaasi kala qaybgalayo kulankooda.
2) Iyadoo la raacayo Xeer-hoosaadka shirkadda, xubinka Guddiga Agaasinka waxa u bannaan in uu kulamada Guddiga kaga qayb galo taleefan ama qaab kasta oo kale oo isgaadhsiineed oo si fiican oo la maqli karo u gaadhsiin karana codkiisa dhamaan xubnaha kale ee kulanka fadhiya, islamarkaana xubin kasta oo kulanka fadhiyaa u tixgaliso in xubintaasi kala qaybgalayo kulankooda.

## Article 48: Participation in meetings

1) Subject to the Articles of Association, a Shareholder may participate in a meeting by phone or by other similar means of communication where each Shareholder present at the meeting can hear what is said by any other Shareholder present at the meeting and each Shareholder so participating at the meeting is deemed to be present at that meeting with the other Shareholders so participating.
2) Subject to the Articles of Association, a director may participate in a meeting by phone or other similar means of communication where each director present at the meeting can hear what is said by any other director present at the meeting, and each director so participating at the meeting is deemed to be present at that meeting with the other directors so participating.

## Qodobka 49aad. Kulanka Guud ee Sanadlaha ah

Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan loogama baahna in ay qabsato Shirweynaha Guud oo sanadlaha ah, haddii aan Xeer hoosaadkeedu si cad u sheegayn in ay qabsato shirweynahan.

## Article 49: Annual General Meeting

An SEZ Co shall not be required to hold an annual general meeting unless expressly required to do so under its Articles of Association.

## Qodobka 50aad: Codsashada shirarka

1) Marka ay codsadaan Saamiileydu, Guddiga Agaasinku ama, hadii uu macagaabanyahay, Xogahayaha Shirkadddu, waxay, iyada oon waxba loo dhimmayn Xeer-hoosaadka Shirkadda, ku baaqi

## Article 50: Requisition of meetings

1) On a Shareholders' request, the directors or if appointed, the secretary, of an SEZ Co shall, notwithstanding anything in the Articles of Association, forthwith proceed to call a General Meeting or, as the case

karaan kulan guud ama kulanka saamiileyaasha nooc gaar ah oo saami in la qabto marka ugu suurtagalsan waase in aanu ka danbeyn laba bilood taariikhda kulanka la codsadey.

2) Codsiga saamiileyda ee Qodobkani khuseeyo, waxa looga jeedaa codsi ay codsadeen saamilayaal goorta codsiga la gubinayo haysta ugu yaraan 5% (Shan boqolkiiba) saamiyayada raasamaalka shirkadda oo xaq u siinaya in uu ka codeeyaan shirka ay codsanayaan.

3) Codsiga Saamiileydu waa in uu qeexo ujeeddada kulanka, waana in uu soo gudbiyo ama ay gudbisay cid matalaysa saamiileha/saamileyda samaynaysa codsiga, loona gudbiyo Xafiiska diiwangashan ee shirkadda Aagga ganacsiga cashuuraha Ka-caagan. Codsigana waxa uu noqon karra qoraalo qaab ahaan isku mid ah oo uu midkasta ku saxeexan yahay mid ama dhawr ka mid ah, ama cid mataleysa saamiilyeesha kulanka codsanaya.

4) Haddii, muddo 21 casho gudahood ah kadib goorta codsiga loo gudbiyay xafiiska Diiwaangshan ee shirkadda, uuna Guddiga Agaasinku ama Xoghaya Shirkaddu uuna iclaamin in kulanku qabsoomayo laba bilood gudahood oo ka bilaananta taariikhda codsiga kulanka, saamiileyda kulanka codsatay, ama qaar kamid ah iyaga oo haysta in ka badan kala badh wadarta xaqa codeynta saamiiliyeda codsiga samaysay, ayaa iclaamin kara qabsoomidda kulankaas; hase yeeshee kulanka ay iclaamiyaan waxa uu qabsoomi karaa uun saddex billod gudahood oo ka bilaabanta taariikhda saamiilyedaasi iclaamisay.

5) Kulanka loo iclaamiyay si waafqsan Qodobkan waa in loo iclaamiyo, intii suurto gal ah, sidii oo uu yahay Kulan uu Guddiga Agaasinku ama Xogahayahu iclaamiyay.

**Qodobka 51:**
**Ogeysiiska Kulanka**

1) Ogeysiiska qabsoomidda Kulanka waa in uu noqdo ogeysiis qoraal ah oo aan ka yarayn 14 casho.

2) Haddii ogaysiiska qabsoomidda Kulanku noqoto muddo ka yar muddada ku cad faqrada 1aad ee Qodobkan 51aad, ogeysiiska qabsoomidda shirkaasi wuu ansaxayaa hadii ay

may be, a meeting of holders of any class of Shares, to be held as soon as practicable but in any case not later than two (2) months after the date of the request.

2) For the purposes of this Article, a Shareholders' request is a request of Shareholders of a company holding, at the date of the request, not less than five per cent (5%) of the share capital of the Shares which at that date carry the right to vote at the meeting requested.

3) The Shareholders' request shall state the purpose of the meeting, and shall be made by or on behalf of each Shareholder making the request and be deposited at the registered office of the SEZ Co. Such a request may consist of several documents in similar form each signed by or on behalf of one (1) or more of such Shareholders.

4) If, within twenty one (21) days from the date of the deposit of the request, the directors or secretary of the SEZ Co do not proceed to call a meeting to be held within two (2) months of the date of the request, the Shareholders making the request, or any of them representing more than one half (1/2) of the total voting rights of all of them, may themselves call a meeting, but a meeting so called shall not be held after three (3) months from that date.

5) A meeting called under this Article shall be called in the same manner, as nearly as possible, as that in which meetings are to be called by directors or secretary.

**Article 51:**
**Notice of meetings**

1) Any General Meeting shall be called by at least fourteen (14) days' notice in writing.

2) If a General Meeting is called by shorter notice than that specified in Article 51(a) above, it is deemed to have been duly called if it is so agreed by a majority in

GOLAHA WAKIILADA ARKIIFIYADA SOMALILAND

ogolaadaan aqlabiyadda saamiileyda xaqa u leh inay ka qaybgalaan oo ka codeeyaan shirweynaha, islamarkaan ah aqlabiyadda saamilayda haysata ugu yaraan shan iyo sagaashan boqolkiiba (95%) saamiga raasamaalka shirkadda.

3) Ogeysiiska qabsoomidda Shirweyneha Shirkada Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, waa in uu sheego xogahan soo socda.
   a) Goorta iyo goobta shirka;
   b) qodobada lagu gorfeynayo shirka; iyo
   c) Hadii uu jiro qaraar caadi ah ama qaraar gaar ah oo la soo jeedinayo, waxa uu yahay qaraarkaasi.

number of the Shareholders having a right to attend and vote at the General Meeting, being a majority together holding not less than ninety five per cent (95%) of the share capital represented by the Shares giving a right to attend and vote at the General Meeting.

3) A notice of a General Meeting of an SEZ Co shall:
   a) set out the time, place and date for the General Meeting;
   b) state the general nature of the General Meeting's business; and
   c) Set out the intention to propose any Ordinary Resolution or Special Resolution and state such resolution.

## Qodobka 52:
## Qodobo guud oo khuseeya kulanka iyo codeynta

Qodobadan soo socda ayaa lagu dabaqayaa kulan guud ama shirweyne kasta oo shirkadeed ama saamiileyaasha saamiyo gaara ah ku leh shirkadda, haddii aanu xeer-hoosaadka shirkaddu si kale dhigeynin:

a) Ogeysiiska qabsoomidda kulan ama shir kasta waxa la siinayaa saamiile kasta oo xaq u leh in la siiyo, iyadoo:
   i. Loogu gaynayo ama loogu dirayo ciwaanka saamiilaha u diiwaangashan ;
   ii. Loogu dirayo Qaabka kale ee elektaroonikada ah ee uu ogolaado in loogu diro;
   iii. Loogu daabaco mareegta Internetka ee uu ogolaado isagu in uu ka daalacdo;
   iv. Qaabkasta oo kale oo uu ogolaaday saamiilahaasi.

b) Haddii uuna xeer hoosaadku si kale dhigaynin, Shirweynaha Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa uu ku qabsoomayaa goob joognimada laba saamiile ama laba qof oo ay iyagu soo wakiisheen.

## Article 52:
## General provisions as to meetings and votes

The following provisions apply to any General Meeting of an SEZ Co or of the holders of any class of Shares in an SEZ Co unless the Articles of Association provide otherwise:

a) A notice of every meeting shall be given to every Shareholder entitled to receive it:
   i. by delivering or posting it to such Shareholder's registered address;
   ii. in such electronic form as agreed by the intended recipient
   iii. by making it available on such website as agreed by the intended recipient; or
   iv. in such other manner or form as may be agreed by the intended recipient.

b) At any General Meeting of the SEZ Co, two (2) Shareholders personally present or represented by proxy shall be a quorum, unless otherwise provided in the Articles of Association

c) Kulanka lagu gorfeynayo xuquuqaha saamiyada gaarka ah ee aan ahayn kulan (adjourned meeting), wuxuu ku qasoomayaa goobjoognimada cidda leh saddex meeloodaw hal meel qiimaha saamiyada noocaas ah, haddii uu yahay kulan socdeyna (adjourned meeting) goobjoognimada hal qof oo leh saamiyada noocaas ama cid uu wakiishay ayuu ku qabsoomayaa.

d) Saamiilaha ay doortaan saamiileyda joogta shirka ayaa noqonya shir gudoonka shirkaasi.

e) Qaraarka lagu meelmarinayo:

i. Cod gacantaag ah, saamiile kasta oo goobjoog ahi waxa uu yeelanayaa hal cod oo kaliya;

ii. Si qarsoodi ah (poll), saamiile kasta waxa uu halkii saami ee kasta ku heli doonaa hal cod oo uu ku codeeyo.

**Qodobka 53aad:**
**Qaraarada**

Haddii uuna xeer hoosaadka shirkaddu ama Xeerkani si kale jideynin, dhammaan go'aamada shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa lagu gaadhayaa Qaraar Caadi ah.

**Qodobka 54aad;**
**Matalaada shirarka**

1) Waxa u bannaan Shirkadda in qaraar uu gaadho Guddigeeda Agaasinka ama unug kale oo maamul keeda ahi ay ugu igmato qof ay u aragto in uu ku haboon yahay in uu ku metelo shirkadda kulan ay shirkadu, ama saamiileyaasha saami kooxeed ee Shirkadda, ama daynleyaasha shirkaddu qabsanayaan ee ay Shirkaddu xaq u leedahay in ay ka qaybgasho.

2) Qof kasta oo loo igmaday si waafaqsan farqada 1aad ee Qodobkan, waxa uu xaq u leeyahay in uu isaga oo matalaya shirkadda u adeegsado awoodaha si lamid ah sida ay shirkaddu u adeegsan lahayd awoodahaasi haddii ay ahaan lahayd qof Shirkadda saamiile ka ah ama daynle ah.

**Qodobka 55aad:**
**Qaraarada Qoraalka ah**

c) At any meeting dealing with a variation of any class rights other than an adjourned meeting, the quorum shall be persons holding or representing by proxy at least one-third (1/3) in nominal value of the allotted and issued Shares of that class, and at any such adjourned meeting, one (1) person holding Shares of the class or such person's proxy shall be a quorum.

d) Any Shareholder elected by the Shareholders present at any such meeting may be chairman.

e) A resolution passed:

i. At a meeting on a show of hands, every Shareholder present in person at any such meeting has one (1) vote; and

ii. On a poll at a meeting, every Shareholder has one (1) vote for every Share held by that Shareholder.

**Article 53:**
**Resolutions**

Unless said otherwise stated in the SEZ Co's Articles of Association or as required under this Law, all decisions of the Shareholders shall made by Ordinary Resolution.

**Article 54:**
**Representation at meetings**

1) An SEZ Co may, by resolution of its directors or other governing body, authorise such person as it thinks fit to act as its representative at any meeting of the SEZ Co, or of the holders of any class of Shares of the SEZ Co, or of creditors of the SEZ Co which it is entitled to attend.

2) A person so authorized is entitled to exercise the same powers on behalf of the SEZ Co which such person represents as that SEZ Co could exercise if it were an individual Shareholder or creditor of the SEZ Co.

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

1) Iyadoo la raacayo wixii xaddiddaad ah ee lagu sheegay xeer hoosaadka ka shirkadda, wax kasta oo lagu gaadho qaraar (marka laga reebo qaraarada lagu eryayo xubin ka mid ah Xubnaha agaasinka ama hantidhawre) oo lagu meel mariyay kulanka saamiileyaasha ama saamiileyaal gaar ah waxa lagu meel marin karaa qaraar caadi ah ama qaraar gaar ah oo qoraal ah si waafaqsan Qodobkan.
2) Hadii uuna Xeer-nidaamiye si kale dhigaynin, Qaraarka qoraalka ah ee shirkaddu wuxuu noqon karaa;
   a) Qaraar Caadi ah, haddii qaraarkaasi ku ansaxay codadka kala badh in kabadan (Simple majority) saamiileyda xaqa u leh in ay codeeyaan goorta la isla qaatey qaraarkaasi; ama
   b) Qaraar Gaar ah, haddii: 1) Qaraarka lagu xusey in uu yahay Qaraar Gaar ah; ama 2) haddii ay saamiilaydu qaraarkaasi ku ansixiyaan codad aan ka yarayn shan iyo todobaatan boqolkiiba (75%) wadarta guud ee codadka saamiilyeda xaq u leh in ay codeeyaan goorta qaraarka la qaadanayo.
3) Qaraarka Caadiga ah ama Qaraarka Gaarka ah ee qoraalka ahi waxa uu ka koobnaan karaa dhawr qoraal oo qaab ahaan isku mid ah oo uu mid kastana ku saxeexan yahay/yihiin mid ama dhawr saamiile, ama cid mataleysa.
4) Qaraarka Caadiga aha ama Qaraarka Gaarka ah ee qoraalka ahi waxa uu dhaqangal noqonayaa goorta la saxeexo qoraalka, ama goorta la saxeexo qoraalka u dambeeya marka uu dhawr qoraal ka kooban yahay; ama taariikh kale oo ka dambeysa saxeexiisa ee lagu sheego Qaraakaas.

**Qodobka 56aad:**
**Wakiilada ( Proxies)**

1) Saamiilaha Shirkadda Daynta xaddidan ee xaqa u leh in uu ka qaybgalo kana codeeyo Shirweynaha Saamileyda ama kulamada Saamiileyaasha saamiyo gaar ahi,, waxa uu xaq u leeyhay in uu magcawdo qof kale ( saamiile ha noqdo ama yaanu

**Article 55:**
**Resolutions in writing**

1) Subject to any restrictions in its Articles of Association, anything that may be done by a Resolution of an SEZ Co (excluding a resolution to remove an auditor or director) passed at a Shareholders' or a class of Shareholders' meeting, may be done either by an Ordinary Resolution or by a Special Resolution in writing, as is relevant, in accordance with this Article.
2) A resolution in writing is passed, unless otherwise prescribed in the Regulations
   a) as an Ordinary Resolution, if it is passed by Shareholders representing a simple majority of the total voting rights of Shareholders who, at the date when the Ordinary Resolution is deemed to be passed, would be entitled to vote; and
   b) as a Special Resolution, only if: (1) it stated that it was proposed as a Special Resolution; and (2) it is passed by Shareholders representing not less than seventy five per cent (75%) of the total voting rights of Shareholders who, at the date when the Resolution is deemed to be passed, would be entitled to vote.
3) An Ordinary Resolution or Special Resolution in writing may consist of several instruments in the same form each signed by or on behalf of one (1) or more Shareholders.
4) An Ordinary Resolution or Special Resolution in writing under this Article shall be deemed to be passed when the instrument, or the last of several instruments, is last signed or on such later date as is specified in the Ordinary Resolution or Special Resolution.

**Article 56:**
**Proxies**

1) A Shareholder of an SEZ Co entitled to attend and vote at a General Meeting or at a meeting of the holders of any class of Shares is entitled to appoint, by notice to the SEZ Co in writing,

| | |
|---|---|
| noqone) oo wakiil u ah ugana qaybgala shirka ama kulanka isaga oo qoraal ku ogaysiinaya shirkadda. | another person (whether a Shareholder or not) as such Shareholder's proxy to attend and vote instead of such Shareholder. |
| 2) Qof kasta oo loo wakiishay si waafaaqsan faqrada 1aad ee Qodobkan , , waxa uu yeelanayaa xaquuqo la mid ah kuwa uu leeyahay saamiilaha uu wakiilka ka yahay , xuquuqahaasi oo ah kuwan soo socdaa:<br>a) In uu ka hadlo ama ra'yigiisa ka dhiibto shirka; iyo<br>b) In uu u codeeyo si waafaqsan wakaaladda la siiyay ama sida uu dhigayo Xeer-hoosaadka shirkaddu. | 2) A proxy appointed to attend and vote for a Shareholder has the same rights as the Shareholder including without limitation to:<br>a) speak at the meeting; and<br>b) Vote (but only to the extent allowed by the appointment or by the Articles of Association). |
| 3) Ogaysiis kasta oo lagu iclaaminayo shirarka ama kulamada Shirkadda Daynta Xaddidan, waa in uu noqdo qoraal si cad u sheegaya in saamiilaha shirkadda ee xaqa u leh in uu shirka ka qaybgalo kana codeeyaa uu xaq u leeyahay in uu magacawdo wakiil ah ama wakiilo uga qaybgala ugana codeeya shirka, loomana baahna in uu wakiilku noqdo saamiile.<br>~~4)~~ | 3) Every notice calling a meeting of the SEZ Co shall contain a reasonably prominent statement that a Shareholder entitled to attend and vote is entitled to appoint a proxy or, where that is allowed, one (1) or more proxies to attend and vote instead of that Shareholder, and that a proxy need not also be a Shareholder. |
| **Qodobka 57aad:**<br>**Shirarka Guddiga Agaasinka**<br>Haddii uuna si kale dhigaynin Xeer-hoosaadka shirkaddu;<br>1) Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Agaasinku waxa uu xaq u leeyahay in uu dalabdo in Guddiga Agaasinku shir isugu yimaado, isagoo ogeysiis qoraal ah siinaya xubnaha kale 14 maalmood ka hor taariikhda qabsoomidda shirka.<br>2) Shirka Guddigaa Agaasinku wuxuu qabsoomayaa haddii ay soo xaadiraan ugu yaraan laba xubnood.<br>3) Dhammaan go'aamada Guddiga Agaasinku waxay ku meelmarayaan cod hal dheeri ah (simple majority), xubin kastaana waxa uu xaq u leeyahay hal cod oo kaliya.<br>4) Xubnaha Guddiga Agaasinka waxa iska dhexdooranayaan xubin noqota Gudoomiyaha Guddia. Haddii codadku is le'ekaadaana Guddoomiyuhu waxa uu yeelanaya cod dheeraad ah. | **Article 57:**<br>**Meetings of the board of directors**<br>Unless the Articles of Association otherwise provide:<br>1) any director shall be entitled to call a meeting of the board of directors upon giving not less than 14 days' notice in writing to the other directors;<br>2) the quorum for the board of directors of any SEZ Co shall be two directors;<br>3) all decisions taken by the board of directors shall be decided by a simple majority and each director shall be entitled to one vote;<br>4) The directors shall appoint one of their own to be the chairperson and in the event of a voting deadlock, the chairperson shall be entitled to a casting vote. |
| **Qodobka 58aad:** | **Article 58:**<br>**Minutes** |

GOLAHA WAKILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

**Hadal Qoraalka Shirarka (minutes)**

Xogahayaha Shirkadda ayaa ka masuul aha qorista, haynta iyo xafidista dhammaan hadal qoraalada shirarka Guddiga Agaasinka iyo shirarka Saamiileyda Shirkadda.

The secretary shall be responsible for keeping and filing all minutes of meetings of the board of directors and for any General Meeting.

**Qodobka 59aad:**
**Diwaangalinta Qaraarada Gaarka ah**

Haddii Qaraar Gaar ah loo meel mariyo si waafaqsan Xeerkan, waa in nuqul ka mid ah qaraarkaas uu si degdeg ah Xoghayaha Shirkadda ama sarkaal kale oo Shirkadda ahi uga diwaangalinayo Waaxda Diwaangalinta-.

**Article 59:**
**Filing of Special Resolutions**

Where any Special Resolution is required to be passed under this Law, a copy of such Special Resolution shall be promptly filed by the secretary or an officer of the SEZ Co at the Registration Department.

**CUTUBKA F:**
**KALA-DIRKA SHIRKADDAHA**

**Qodobka 60aad:**
**Kala-dirka Shirkadda**

Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan , waxa lagu kala diri karaa xaaladahan soo socda mid kood :

1) kala dirid Dedeg ah (summary widing up) si waafaqsan Qodobka 61aad;
2) Codsiga cid dayn ku leh shirkadda si waafqsan Qodobka 64aad; ama
3) Maxkamad awood u leh ayaa kala diri karta si waafqsan Xeerarka musalafnimada ama Xeerar kale oo khuseeya oo dhaqangal ka ah Jamhuuriyadda Soomaliland.

**CHAPTER F:**
**WINDING UP**

**Article 60:**
**Winding up**

The winding up of an SEZ Co may either be:

1) summary under Article 61
2) by its creditors pursuant to Article 64; or
3) By any competent court under the applicable bankruptcy laws or other applicable legislation which is effective in the Republic of Somaliland.

**Qodobka 61aad:**
**Kala dir Degdeg ah (Summary Winding up)**

1) Qodobkani waxa lagu dabaqayaa kala-dirista shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan, haddii ayna jirin dayn lagu leeyahay ama ay awooddo inay ku bixiso dhammaan daynta lagu leeyahay muddo lix bilood gudahood ah oo ka bilaabmeysa taariikhda bilowga kala-diristeeda; kala diristaasina waa kala dir degdeg ah.
2) Shirkadda Aagga Ganacsiga Cashuuraha Ka-caagan waxa loo kala diri karaa si waafaqsan Qodobkan iyada oo la diyaarinayo warbixin masalafnimo oo waafaqsan faqrada 3aad ee Qodobkan; iyo iyadoona
   a) 28 cisho gudahood kadib marka warbixinta musalafnimo ay wada saxeexaan

**Article 61:**
**Summary winding up**

1) This Article applies to the winding up of an SEZ Co which has no liabilities or which is able to discharge its liabilities in full within six months after the commencement of the winding up and such a winding up is a summary winding up.
